Believe in children Barnardo's

# ISGAARSIINTA – FOOMKA OGOLAANSHAHA WAX KU SOO BIIRINTA

Inteena Barnardo's joogta waxaan taageernaa qaar ka mid ah caruurta aadka dhibta ugu nugul ee UK anaga oo u fidina adeegyada ma huraanka ah, ololeyaal iyo cilmi-baarisyo, waxaan kaaga mahadcelineynaa sida aad noo kaalmeysey. Haddii aad heyso wax su'aalo ah oo foomkan ku saabsan ama sida foomka loo soo buuxinayo, fadlan la hadal qofka aad la xiriirto ee Barnardo's jooga, tusaale ahaan qofka shaqaalaha mashruuca kuu ah ama midka aad la xiriirto ee kooxda suuq-geynta ka tirsan. Iyagaas waxaa farxad gelin doonta inay ku kaalmeeyaan oo waxayna ku siin doonaan fursad aad su'aalo ku weydiisid.

Barnardo's waxa ay soo saartaa tiro aalado isgaariin ah oo ay dadka ugu sheegto hawsha aan qabano, adeegyada aan bixino iyo lacag u uruurinta hawsha aan qabano. Waxaan rabnaa inaan bulshada la wadaagno waxa ay la kulmaan dadka dhab ahaan u isticmaala adeegyada aan bixino oo waxay taas nagu kaalmeyneyso soo bandhigista waxtarka ay leedahay hawsha aan heyno. Foomkan oo aad soo buuxiso micnihiisa waa inaad noo ogolaatey istcmaalka wixii macluumaad ah ee aad na siiso; kuwan waxaa wadar ahaan loogu yeeraa "**wax ku soo biirin**".

Marka aad wax ku soo biirinta bixineyso, waxaa lagu siin doonaa kaar ay ku qoran tahay faahfaahinta sida aad noola soo xiriireyso haddii aad rabi laheyd inaad nagala hadasho wax ka mid ah wax ku soo biirintaada ama ka laabashada wax ogolaanshahaagii (haddii aad waqti dambe sidaas go'aansatid).

| | | | |
|---|---|---|---|
| Magaca dhameystiran | | | |
| Cinwaanka | | | |
| | | Bost kodh | |
| Teleefoonka | | | |
| Email-ka | | | |

**Maxaa wax ku soo biirinteyda loo isticmaali doonaa?** (Fadlan tik sii kuwa aad ogoshahay)

**U soo bandhigida:** Dadka ka shaqeeya Barnardo's gudaheeda iyo banaankeedaba ☐

**Website-yada:** Website-ka iyo internet-ka Barnardo's (website-ka shaqaalahayaga) ☐

**Warbaahinta Bulshada:** Bogaga warbaahinta bulshada ee Barnardo's iyo iidhehyada warbaahinta bulshada oo ay ay ka mid ahaan karaan: pod cast-ka, Facebook-ga, Twitter-ka, LinkedIn-ka, Instagram-ka, Pinterest-ka, YouTube-ka, Vimeo-ga iyo Snapchat-ka Barnardo's ☐

**Faafinta:** Buug-yareyaasha, warbixinada, boostarada, war-sideyaasha iyo iidhehyada kale iyo aaladaha suuq-geynta ☐

**Daabacaada iyo online:** Heer qaran(UK), wargeysyada; majaladaha iyo baraha wararka heer gobol & degmo ☐

**Telefishan iyo Raadiyo:** Telefishinka heer qaran iyo gobol; raadiyaha heer qaran, gobol iyo degmo ☐

**Codsiyada Lacag Ururinta:** waraaqo toos ah, emai-lo iyo war ku gudbinta warbaahinta bulshada oo lagu codsanayo soo ururinta/soo dhiibista lacag lagu taageerayo hawsha ay Barnardo's heyso ☐

Wax ku soo biirinta aad bixisey waxa ay ahaan doontaa mid:

- La keydiyo lana isticmaalo muddo ilaa saddex sano ah, haddii aadan ogolaanshahaagii ka noqon;
- Loo isticmaalo kor u qaadista ama iidheh u sameynta ujeedooyinka Barnardo's iyada oo la raacayo wadooyinka aad ogolaatey in aan isticmaali karno;
- Si sugan loo keydiyo oo lala wadaago keliyah kuwa noo ah adeegayaasha ama kuwa uu iskaashiga naga dheexyo ee nala shaqeeya si aan adeegyada u bixino ama u sii hore marino; iyo
- (way dhici kartaa in) laga yeelo wax ay heli karaan xubnaha hawl-yaqaanada iyo kooxaha adeegyada Barnardo's ama wax ay isticmaalaan kuwayada lacag soo ururinta qaabilsan.

Wax ogolaanshahaaga waqtiga aad doonto aad bedeli kartaa ama ka noqon kartaa haddii aad qoraal ahaan Barnardo's u soo ogeysiiso. Marka aad wax ku soo biirinta bixineyso, waxaa lagu siin doonaa kaar ay ku qoran tahay faahfaahinta sida aad wax ogolaanshahaaga uga noqon kartid, haddii aad waqti dambe sidaas go'aansatid. Hase ahaatee, ogow in, mar haddii macluumaadka wax ku soo biirintaada internet-ka la geliyo, ay wax ka dhinmayaan heerka aan warkaas faayey ku xakameyn karno, kula soo noqon karno oo/ama aan ku tiri karno. Tan micnheedu waa in xitaa haddii aan anaga istcmaalka macluumaadkaas joojino ay weli suurtogal tahay in internet-ka laga heli karo. Waxaa kale oo aanan xakameyn karin nooca ka faalooyinka warbaahinta bulshada lagaga soo bixin karo. Fadlan tan maanka ku hey marka aad ogolaansha kore na siineysid.

Barnardo is a registered charity in England and Wales 216250 and in Scotland SC037065, and a company limited by guarantee [61625 England].

**Marna faahfaahintaada ma gadeyno ama cid saddexaad lama wadaageyno haddii uu sharciga sidaas Barnardo's uga baahdo ama haddii aan aaminsanahay inay halis jirto ma aha ee.**

Goor kasta oo aan u baahano isticmaalka wax ku soo biirintaadii, waan ku la soo xirrireynaa si aan u hubino inaad isticmaalkeeda noo ogoshahay. Waxaa kale oo aan kuu sharxi doonnaa waxa aan u isticmaali doonno. Tan waxaan u sameyneyno waa hubsiimada in ay wax ku soo biirintaada weli tahay mid sax oo haboon.

---

**Ma ahaan kartaa mid qarsoon oo aan la garan karin?**
Waa aad dooran kartaa in magacaaga runta ah la faafiyo ama inaad qarsoonaato oo aan lagu garan (oo aad magac been ah kuu bixineyno). Fadlan tik sii kuwa mid kuwa soo socda ka mid ah:

Waan ogolahay isticmaalka magaceyga ☐ Ma ogoli isticmaalka magaceyga ☐

Ma jiraan waxyaabho lagugu garan karo oo AADAN rabin in isgaarsiintayadan lagu soo daro? *Tusaale ahaan, halka aad joogto ama da'da caruurtaada* ____________________

---

**Macluumaad Dheeraad ah**
Sababta aan su'aalahan kuu weydiineyno, waa hubsashada inay wax walba oo aan Barnardo'sahaan u heyno ku jiraan dad isku dhaf ah. Fadlan halka banana ku qor ama tik sii 'ma rabi in aan sheego'. **Danta macluumaadkan laga leeyahay waa uun u isticmaalka gudaha.**

**Da'**____________________ Ma rabi in aan sheego ☐

**Sinjiga(Ethnicity)**____________________ Ma rabi in aan sheego ☐

**Isirka(Gender)**____________________ Ma rabi in aan sheego ☐

---

**Waan ogolahay inaan ogolaanshaheyga bixiyo**
Fadlan foomkan saxiix si aad u muujiso inaad ogoshahay in wax ku soo biirintaadaii ay Barnardo's u isticmaasho ujeedooyinka kor lagu sooo sheegey. Macluumaadka wax ku soo biirintaada la xiriira lama isticmaali doono ama lama keydin doono waqti saddex sano ka badan, haddii aad waqtigaas ka hor a weydiisid inaan isticmaalkeeda joojino ma ahee.

| | | | |
|---|---|---|---|
| Saxiix | | Taariikh | |

**Haddii aad 18 ka yar tahay, waxaan u baahan nahay ogolaashaha waalid, Ilaaliye ama qof weyn oo kaa mas'uul ah.**

| | | | |
|---|---|---|---|
| Saxiixa waalidka/ Ilaaliyaha (Guardian) | | Taariikh | |

---

Fadlan foomka aad soo buuxisey u soo celi qofka kiiskaaga ka shaqeeya ama qofka aad Barnardo's kala xiriirto. Haddii kale waxaad email u soo diri kartaa consentforms@barnardos.org.uk. Mahadsanid.
Haddii aad heyso wax su'aalo ah oo foomkan ku saabsan, fadlan la xiriir qofka kiiskaaga ka shaqeeya ama qofka aad la xiriirto ee Barnardo's jooga.

**Badbaadinta Daataha:** Taageerada aad Barnardo's siiso waa mid qiimo u leh oo waxaan kuu balanqaadeynaa ixtiraamka waxa shakhsi ahaan kuu qaaska ah. Daataha (macluumaadka) aan ururineyno ee aan heyno waxaa loo maamulaa si waafaqsan GDPR (Shuruucda Guud ee Badbaadinta Daataha) iyo Xeerka Badbaadinta Daataha (Date Protection Act) ee 2018. Macluumaadkaagii shakhsi ahaaneed ma soo bandhigeyno oo cid kalena lama wadaageyno ogolaansahaaga la'aantiisa, haddii uu sharciga sidaas Barnardo's uga baahdo ama haddii aan aaminsanahay inay halis jirto ma aha ee. Ogeysiiska siyaasadaas oo dhameystiran baad ka heli kartaa halkan ah: www.barnardos.org.uk/privacy-notice

Barnardo is a registered charity in England and Wales 216250 and in Scotland SC037065, and a company limited by guarantee [61625 England].